Bundesamt für
Fremdenwesen
und Asyl

Macluumaad ku saabsan hawl-socod siinta xogta wada jirka ah

“Diiwaan-gelinta dhexe ee muwaadhiniinta shisheeye”

sida waafaqsan qodobka 13 iyo 14 ee Xeerka Ilaalinta Xogta Guud (DSGVO)

Magaca iyo faah-faahinada xiriirka ee ilaaliyaha:

Bundesamt für Fremdenwesen und Asyl (Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka)
Modecenterstraße 22, 1030 Wien
Teleefoonka: +43- 59 133 98 7004
Faakiska: +43- 59 133 98 7399
Ii-maylka: BFA-Einlaufstelle@bmi.gv.at

Faah-faahinada xiriirka ee shaqaalaha ilaalinta xogta:

Teleefoonka: +43- 59 133 98 0
Ii-maylka: BFA-Datenschutzbeauftragter@bmi.gv.at

Ujeeddooyinka loogu talogalay hawl-socod siinta midaas oo loogu danleeyahay xogta shakhsiyeed:

Hawl-socod siin la wadaago iyo isticmaalida xogta muwaadhiniinta shisheeye ee ka ahaata Wasiirka Arimaha Gudaha ee Federaalka, Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka, maamulada matalaya, Maxkamada Maamulka Federaalka iyo maamulada lagu sheegay Qaanuunka Deganaansho ee Ajaaniibta Joogtada iyo Kumeel gaarka ah, saldhigyada booliiska goboleed ee lagu sameeyo diiwaan-gelinta dhexe ee loogu talogalay ujeeddooyin booliiska ajaaniibta ah, deganaanshaha iyo maamulada magan-galyada.

Aasaaska sharciyeed ee loogu talogalay hawl socod siinta:

Qodobka 26, 27, 29 iyo 58 ee sharciga federaalka ee nidaaminaya shuruudaha guud ee xiriirka la leh hawl-socod siinta kahor Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka loo bixiyay u qalmida ilaalinta caalamiga ama qaranka ah, oggolaansho deganaansho sabab u ah duruufo khaas ah, dhoofin, dib u dhigid ka saarid, sidoo kale amrida tallaabooyin lagu joojinayo deganaanshaha iyo soo saarida dukumeentiyada Austariyan ee loogu talogalay ajaaniibta (BFA Qaanuunka Hawl-socod siinta, BFA-VG) xiriirka la leh Qaanuunka Dowlada-e, iyo Qaraarka Xadeynta Dowlada-e, iyo Xeerka Diiwaan-gelinta SourcePIN, iyo Qaraarka Diiwaan-gelinta kaabaha ah, iyo Qaanuunka Federaalka ee ku saabsan Saarida Dadweynaha,Meesha shaqada, Tirakoobka Guriga iyo Dhismaha (Qaanuunka Diiwaanka Tirakoobka).

Muddada la keydin doono xogta shakhsiyeed:

Xogta la qaaday sida waafaqsan BFA Qaanuunka Hawl-socod siinta waa in loo tir-tiraa si muuqata ugu dambeysta
1. marka qofka la siiyo dhallashada dalka Austariyan sida ugu dhakhsiyaha baddan ee aan xogtu ugu baahnayn ka saarid laga saaro dukumeentiga ayaga loogu sameeyay sida ahaanshahooda dad ajaaniib ah;
2. marka Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka ama Maxkamada Maamulka Federaalka lagu soo wargeliyo dhimashada qofka oona ay dhaaftay ama gudubtey shan sanno tan iyo markaasi, ama

3. toban sanno kadib go'aanka ugu dambeeya ee ku saabsan hawl-socod siinta kahor inta aan soo saarin Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka ama maxkamada Maamulka Federaalka, ama kadib ka bixida ama ka noqoshada codsiga, xirida codsiga xiriirka la leh hawl-socod siinta, ama marka uu codsigu noqdo mid ka baxsan arin-qofka la xiriirta. Midaan ma khuseyso marka mamnuucid joogto ah oo soo gelida waddanka ahi ama deganaansho lagu sameeyo qofka. Haddii ansixida ahaanta tallaabada kumeel gaarka ahi ee joojinaysa deganaanshaha ay gudubto kadib marka arinta lagu sheegay jumlada koowaad, xogta waa in la tir-tiraa gudbida ansixidaasi darteeda.

Qaybaha dadka qaatayaasha ah ee qaata xogta shakhsiyeed:

1. Wakaaladaha ammaanka sida lagu qoray gudaha qodobka 4-aad ee Qaanuunka Booliiska Ammaanka

2. Saldhigyada booliiska goboleed

3. Maamulada lagu sheegay Qaanuunka Deganaanshaha Ajaaniibta Joogtada iyo Kumeel gaarka ah

4. Maamulada dibada u matalaya dalka Austariyan

5. Xafiiska Socdaalka iyo Magan-galyada ee Federaalka

6. Maamulada xeer-ilaalinta

7. Maamulada dembiga maaliyadeed

8. Maamulada loo xilsaaray fulinta Qaanuunka Shaqada Ajnabiga

9. Waaxyada diiwaan-gelinta rayidka

10. Maamulada dhallashada

11. Maamulada diiwaan-gelinta deganaansho

12. Xafiiska Wakiilka Sare ee Qaramada Midoobay ee loogu talogalay Qaxootida ku nool dalka Austariya

13. Lataliyayaasha sharciyeed sida waafaqsan qodobka 49-52 ee Qaanuunka Hawl-socod siinta BFA

14. Qaybaha qandaraas lagula galo heshiiska xadidaada gobolka ku xiga maamulada gobolka ee waddanka, kuwaas oo lagu dabakhayo xeerka Dublin, midkaas oo ah/mid u qalma baaritaanka codsiga magan-galyada ama codsiga loogu talogalay ilaalinta guud ama qaranka

15. Maamulada ajnabiga ah ee mas'uulka ka ah fulinta Heshiiska Geneva ee ku saabsan Qaxootida, marka xadidaada qofka iyo sidoo kale bixinta magan-galyada aanan suurtogal ahayn ayada oo aan loo wareejinin maamuladaasi waxaana la hubsanayaa in xogtaasi aanan geli karin maamulada waddanka uu qofka magan-galyo raadiska ahi ama qaxootida ahi sheeganayo in uu ka cabsanayo in ay dilaan

16. Maamulada nolol wanaaga dhallinyarada

17. Hay'adaha federaalka iyo gobolada ee qabanaya hawlaha xiriirka la leh fullinta Heshiiska Adeegaha iyo Daryeelka Aasaasiga ah

18. Adeega Shaqaalaynta Dadweynaha ee Austariya (AMS) iyo maamulada deegaanka ee loo xilsaaray bixinta daryeelka iyo caawimaada isdhexgalka

19. Machadyada caafimaad ee goboleed iyo Machadyada Ceymiska Bulshadeed ee Midowga Austariyan

20. Maxkamadaha maamulka ee gobolada federaalka

21. Maxkamadaha dembiyeed iyo rayidka sidoo kale xabsiyada

22. Wasaarada Federaalka ee Yurub, Isdhexgalka iyo Arimaha Dibada

23. Maamulada waddanka asal ahaan loo dhashay

24. Maamulka Diiwaan-gelinta SourcePIN ee ah gudaha shuruudaha lagu qoray Qaanuunka Dowlada-E

25. Tirakoobyada Austariya

26. Arimo qaran oo ah xiriir lala yeesho maamulo deganaansho kale oo ah waddamada xubin ka ah Midowga Yurub (EU) tooska Wasiirka Arimaha Gudaha ee Federaalka

27. Wakaaladaha ammaanka ajnabiga ee ku yaala dhammaan waddamada adduunka

28. Ururo ammaan caalami ah

29. Maxkamada Maamulka Federaalka

30. Waddamada xubin ka ah Midowga Yurub (EU)

31. Wasiirka Arimaha Gudaha ee Federaalka

32. Lataliyayaasha dib u noqoshada

Hawl-fuliyayaasha (sida loogu qeexay gudaha qodobka 4, maadada 8 ee DSGVO ku xigta qodobka 36, qaybta 2, maadada 9 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG)): IBM Österreich - Internationale Büromaschinen Gesellschaft m.b.H. und Microsoft Österreich GmbH, Bundesrenchenzentrum GmbH, Atos IT Solutions and Services GmbH

Xuquuqaha qofka xogta:

Xaqa loo leeyahay in la gudbiyo cabasho:

Xaqa loogu soo gudbiyo cabasho Maamulka Ilaalinta Xogta Austariyan (1030 Wien, Barichgasse 40-42, teleefoonka +43 1 52 152-0, ii-maylka dsb@dsb.gv.at) waxaa lagu dabakhayaa sida waafaqsan qodobka 24, cutubka 1 ee Qaanuunka Ilaalinta Xogta (DSG).
Xaqa gelida, xaqa sixida ama tirida xogta shakhsiyeed:

Xaqa gelida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 15 ee DSGVO.

Xaqa sixida waxaa lagu qoray gudaha qodobka 16 ee DSGVO.

Xaqa tirida (‘xaq loo leeyahay in la iska iloobo’) waxaa lagu qoray qodobka 17 ee DSGVO.